WardheerNews
NEWS FROM AFAR!

# Seygii Saaqidka ahaa (Qaybtii 9aad)

**W.Q. Cabdicasiis Maxamed shidane**

**Nofember 15, 2016**

---




Waxaan sugnaba, waxaa la soo gaaray habeenkii aan badda gali laheyn.Waa habeen aan in badan naawilayay. In aan dhibtii iyo rafaadkii igu haysay Libya aan ka baxo oo iskaga dhoofaa waxay ii ahyd farxad, haseyeeshee khatarta badda ee waxaan la kulmi doono aanan ogeyn inaan u bareeraa waxay dhanka kale igu haysay warwar iyo degennaansho la'aan maskaxeed. Dadka aan israaci rabno waxay wacayeen ehelladoodii iyo ciddii ay rabaan. Taleefoonka ninka Soomaaliga ah ee la shaqaynayay kooxda dadka tahriibisa, ayaa fayl loogu jiray, aniguse waxaan doorbiday in aanan wicin qofna. Hooyaday uma sheegi karo, oo waxaan ka cabsanayay in ey naxdin u dhimato, ninkii i qabayna isaga hadalba nagama dhexeeyo, waxaan filayaa inuu ku farxi lahaa haddaan u sheego dhibta aan ku suganahay iyo safarka halista badan ee aan caawa gelay, sidaas darteed, waxaan go'aansaday in aanan cidna wicin, oo wixii dhib iyo dheef ah ay aniga igu koobnaadaan. Ma aaminsanayn in hadal ama duco ay celin karaan waxa igu dhici doona.

Jawiga aan ku suganahay waa mid baqdin leh, qof walbaana waa khushuucsan yahay, oo wuxuu baryaa Eebbaha uu aaminsan yahay. Runtii, anigu isku ma hawlin in aan tabar iyo karti weydiisto Eebbe, sababta ay naftaydu uga biya-diidsaneyd ducadaas ma garan karo, mana jacleyn in aan kallifo oo wax aysan dareemeyn ku dirqiyo. Dadku waxay isku gu jireen qeyb masiixiyiin ah oo Ciise baryeysa, iyo qeyb muslimiin ah oo Alle tuugaysa. Qof walba wuxuu gurmad weydiisanayey abuuraha uu markaas rumaysan yahay.

Mar ay ka dhimman tahay saacado kooban in aan badda galno, oo naaquudihii kaxeyn lahaa doonta la soo diyaariyay, ayaa hal mar waxaa noo soo dhacay askar hubaysan. Sawaxan iyo qaylo ayaa isqabsaday, qof walbana wuxuu raadinayay siduu ku baxsan lahaa. Askartu waxay kor iyo hoos u ridayeen xabbado, si ay u qabqabtaan dadka, balse, qof walba wuxuu u cararay meeshii wajigiisa ku aadanayd. Anigu waxaan ka booday darbi dheer, waxaana ka murgacaday lugta midig. Aniga oo dhutinaya oo lugta qaadi la', ayaa haddana baxsad ahaa. Illin iyo neeftuur ayaan isku darayay, ilaa aan meel cidla ah iskaga dhacay, ka dib markii aan tiira dhigay, oo tabartii iga


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

dhammaatay. Sidaas ayuu ku dhicisoobay safarkii aan muddada dheer sugayanay ee aan badda ku gali lahayn. Si aan u helo gargaar, waxaan kaalmo weydiistay qoys Liibiyaan ah oo meesha aan ku dhacay ka ag dhawaa. Waa mar aan nafta u yaabay, oo aan dareemay saxariirta safarka iyo tiiraanyada Tarhriibka.

Run ahaantii, way i saacideen, waxeyna i siiyeen dheef iyo dhar aan xirto, lugtii an ka murgacadana waa iga xirxireen,  Hal maalin ayaan la joogay, ka bacdina waxey ii soo qaadeen caasimadda, taas oo ah halkii aan ka anba-qaaday markii hore. Isma laheyn waxaa jira dad Liibiyaan ah oo sidaas u naxariis iyo naruuro badan, balse, malahaygu waa khaldanaa. Waxaan soo caga-dhigtay Tiriboli, aniga oo aan shilin isku furan karin. Magaalada raaf ballaaran ayaa ka jira, oo waxaa lagu jiray xilliga bad-furanka la yiraahdo oo tahriibku billaawdo.

Waan yara hitinayey, markaan Daraabulis imaaday, balse, fadhi meel ii ma yaallo, oo waa in aan nolashii legdan la galo, maxaayeelay, nolashu soo ma dhaweyso dadka guuldarrada isku dhiiba. Waxaan dib u billaabay shaqadii aan qaban jiray, oo ahayd in aan ka adeego guryaha qoysaska Carabtu leeyihiin, si aan u helo qarash aan mar kale ku baxo oo aan badda ku galo, haddii kale, waa bartaada taagnaaw iyo Liibiya oo ah dal aan libin iyo liibaan laga keeni karin. Qorshaha waxaa ii gu jirta in bilaha soo socda aan baxo, hase ahaatee, qaddarta Eebbe waa qaddiyad qaadashadeeda mudan. Mar laga joogo in mudda ah oo aan wax xariir ah aanan la sameyn hooyadey, ayaan wacay mar danbe, si aan codkeeda uun u maqlo.

Nasiib darro, mar walba oo aan isku dayo in aan hooyo xariiriyo, waxay i soo hordhigi jirtay dhibka kala haysta ninkaygii iyo qoyskayaga. Hooyo waxay ka fakartaa maalin walba meesha aan ku suganahay, nolal iyo geeriba, intaas kaliya ma ahan, ee waxaa u sii dheer in ay soo aruuriso oo hadba qof ka soo tuugto lacagtii beenabuurka aheyd ee uu igu sheegtay saaqidkii sayga ii ahaan jiray. Runtii, dareen xaasnimo igu ma jiro, oo nolashayda waan ka tirtiray ninkaas, balse, waxa idaba taaggan ayaa ah dhaqan bulsho iyo sheeko shaati diin loo galiyay.

Saddex bilood ayaan shaqeynayay, waliba shaqo adeg oo aanan cisi iyo sharaf ku haysan, waxaanan keydsaday qarash iigu filan safarka aan doonayo in aan badda ku galo. Toogtaan waan ka waaya-aragsanahay sidii hore, oo uma indhaxirni sida markii hore oo kale. Waxaan kala bartay qolyaha wax tahriibiya, iyo dhallinyarada Soomaaliyeed ee la shaqeysa. Waan ku qasbanahay in aan kala barto tuugada aan isku dhiibi doono ee badda i galin doonta. Si walba oo aan isku adkeeyo, nolashayda kama marnayn dhib iyo culeys saameeyay fakarkayga iyo hannaanka aan u noolahay. Diyaar garow ka dib, waxaan heshiis la galay mid ka mid ah kuwa wax tahriibiya.

Lacagta aan ku soo baxayo waxaan ku xiray dammaanad, si aysan u dhicin wixii safarkii hore aan kala kulmay oo ahaa dhac iyo garaac. Kalsooni ma jirto, sababtoo ah waxa aan nolasha ka bartay ayaa ah in dhibka kan ugu adag ka yimaado dadka aad aaminto, kalsoonidaadana aad siiso. Taas waxaan ka soo bartay nolashii na dhex martay aniga iyo seygii aan islahaa wuxuu kuu noqon doonaa faraj iyo farxad, balse, igu noqday Furuq farqaha ii gu jira, nolashaydana daba gaddiyay guud ahaan iyo gaar ahaanba, silican aan manta ku suganahayna sababta u ahaa.


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Wax waqtigu isguraba, waxaana isla meeldhignay aniga iyo qolada wax tahriibisa ee aan la heshiiyay in aan ku baxo hab fudud oo aan halis badan laheyn. Wax walba waa la sheegi karaa, balse, markii biyaha la galo waxaa badbaadi kara qofkii dabaal yaqaan iyo ruuxii Alle la jiro. Lacagtii waxaan ugu dhiibay niman xawaalad ka shaqeeya, taas oo micnaheedu yahay haddii aan baddaas nabad ku galno in lacagtaasi u xalaalowday qolyaha wax tahriibinaya. Heshiiska ku ma jirto in aan nabadtago, maxaayeelay, cid ogaan karta ma jirto meel ay naftu ku danbeyn doonto. Habeen goorsheegtadu tilmaamayso saqdhaxe ayaa nalaga soo kaxeeyay meel nalagu ururiyay oo aan ku xaraysneyn. Tira ahaan waxaan gaaraynaa afartan qof oo rag iyo dumar isku gu jira.



Waxaa na loo geeyay tobban kale oo iyana meel kale ku xareysan, sidaas ayaan kontan qof ku noqonnay. Inta howshani socotay waxaan arkayay askar iyo saraakiil howsha wax ka wadda, taas oo i galisay in dawladda Korneel Qaddaafi howlaha Tahriibka ku lug leedahay. Wax cabsi ah majirin, waayo ciidankii laga cabsan lahaa ayaaba wax raraya. Baqdintii la xariirtay in na la xiro, ama ciidan noo soo dhaco, meesha way ka baxday. Doontii ayaa loo soo dhaweeyay xeebta, waxayna billaawnay in aan mid mid u korno. Qofkii laga dareemo jiljileec iyo cabsi, waa la jeega-dharbaaxayey. Kontankeenniiba waan wada kornay, wiil Soomaali ah ayaa waday doonta. Habeen ayay ahayd. Halkaas ayaan ka soo billaawnay safar aan sahay fiican loo wadan, oo halisi ku hareeraysan tahay. Wax walba ogaal ayaan u sameynay.

Dhawr caag oo biya ah iyo rooti ayaa noo saaran doonta, dhaxan xunna way dhacaysaa, oo fanfaniinka biyaha iyo labadhaca hirarka ayaan u dhaxeynay. Qof meesha uu fadhiistay iska nuuxin karta ma jirin. Matag, kaadi, ama saxaro, wixii ku qabta ama aad dareento, waa isku tasho, oo qof aad wax ka weydiin karto ma jiro. Baddu sida la sheegay la ma ahan saxiib wacan Insaanka. Mararka qaar way nagu kaceysay baddu, oo doontu waa na la sabbeynaysay, hadba dhinac ayaan u ciireynay, ilaa aan ka quusannay nolasha. Lama yaqaan goorta uu dami doono, ama cilladoobi doono matoorka waxaas oo hirar ah dhex maraya. Cabsida iyo mugdiga aan ku dhex sugannahay, waxay i tuseysay qiima yarida nolasha adduunyo. Dhawr mar ayaan damcay in aan iska tuuro doonta, oo nolashaan dhibka badan isdhaafsiiyo, balse, waan iscelinayay mar walba, oo hawada naftayda isku ma dhiibeyn.

Naxdintii ugu weyneyd waxay aheyd, markii naaquudihii doonta waday uu shitay wax sigaar u eg, balse, aan aheyn. Mar danbe ayaa wiil ii dhawaay oo doonta ila saarnaay wuxuu ii sheegay in baddu kacsan tahay, naaquudihii doontana uu Xashiish shitay, oo xaalku Allow sahal yahay. Qof walba wuu hundhursan yahay, doontuna hadba dhinac ayey na la aadeysay, wax aan sameyn karno ma jiraan, xitaa jiho aan ku soconno ma garaneyno. Habeenkii oo dhan waan soconnay, ilaa uu waagii baryay, oo xoogaa cadceed ah aan helnay. Neef ayaa naga soo wada go'day, waayo ugu yaraan


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

waxbaan arkeynaa, oo mugdigii waan ka soo baxnay. Intaas ka dib, naaquudihii wuxuu amar ku siiyay gacanyarihiisii in uu siiyo qof kasta dhawr kabbo oo biya ah iyo jab Rootiya, si calooshu u xasisho, dhuuntuna noo gu qoydo.

Mar aan sii socoonno habeen iyo maalin badhkeed, ayaan isweydiinnay halka iyo jihada aan marayno. Naaquuduhu waxa uu iska dhigayay qof khabiir ku ah safarrada ceynkaan ah, wuxuuna noo sheegay in aan ku sugannahay biyaha caalamiga ah oo aan ka soo dhammaannay biyihii dalka Liibiya, matoorkuna fiican yahay, balse, wax walba dhici karaan, oo aysan jirin ceymasho buuxda. Dadka qaar waa hurdayaan, qaar waaba suuxsan yihiin, oo miyir iyo maskax toona ma hayaan. qaar aan anigu ku jirayna il isku ma eysan geynin tan iyo markii aan soo kornay doonta.

La soco qeybta 10aad

W/Q: Cabdicasiis Maxamad Shidane.
Email: shidane05@hotmail.com
---------------
**Sidoo kale akhri**

Qeybtii 1aad
Qeybtii 2aad
Qeybtii 3xaad
Qeybii 4aad
Qeybtii 5 aad
Qeybtii 6 xaad
Qeybtii 7 aad
Qeybtii 8 aad


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**